## Qodobka I, Qaybta A ee Xeerka Waxbarashada Dugsiyada Hoose iyo Sare (ESEA)

**Ayaa siisa caawimo lacageed gobollada iyo degmooyinka dugsi si ay ula kulmaan baahida waxbarashada Ardayda halista u ah inay ku dhacaan shuruudaha waxqabadka tijaabada ah ee xisaabta, akhriska, iyo qorista. Qodobka I, Qaybta A ayaa bixisa adeegyo tacliimeed dheeraad ah iyo waxqabadyo taageera ardayda loo garto halista ugu badan ee ah inay ku dhacaan.**




**Title I, Part A Office**
Office of Superintendent of Public Instruction
Old Capitol Building
PO Box 47200
Olympia, WA 98504-7200
360-725-6100

U.S. Department of Education
1-800-USA-LEARN (872-5327)



**OSPI ayaa u bixisa marin siman dhammaan barnaamijyada iyo adeegyada bilaa kala takoor ku saleysan rag/dumar, jinsiyadda, caqiidada, diinta, midabka, isir qaran, kuwa si sharaf leh looga sii daayay ciidamada ama heerka ciidamada, dookh isku-tag oo ay ka mid yihiin muujinta ama isku-aragga jandar, jiritaanka naafanimo kasta oo ah kuwa dareen, dhimireed ama itaalka jidhka ah, ama isticmaalka eyga tababbaran ee hagaha ah ama xayawaan adeeg ee u qof naafo ahi isticmaalo. Su'aalaha iyo cabashooyinka ku eedeynta takoorka waa in lagu hagaajiyaa: Equity and Civil Rights Director (360) 725-6162 or P.O. Box 47200 Olympia, WA 98504-7200.**


# Hagaha Waalidka

## Waa maxay Qodobka I, Qaybta A?

Somali

## Dugsiyadee ayuu Qodobka I, Qaybta A U Adeegaa?

**Barnaamijka ayaa wax u tara ardayda dhigata dugsiyada hoose iyo sare (dhexe iyo sare), dugsiyadaas oo muujiyay baahida loo qabo caawimo waxbarasho dheeraad ah. Adeegyada Qodobka I, Qaybta A ayay heli karaan ardayda dhigata dugsiga gaarka ah, ee codsaday inuu ka qaybgalo barnaamijka Qodobka I, Qaybta A.**

## Waalidiinta

**Waxaad saamayn ku yeelan kartaa guusha ilmahaaga adiga oo ka qayb-qaate firfircoon ka noqda dugsiga ilmahaaga:**

- ✓ **Ka warhay:** Adiga oo ka warhayda oo uga jawaaba si dhakhso leh dhammaan la soo xiriirka ka yimaaddugsiga ama degmada dugsi.
- ✓ **Tusaale u noqo:** Adiga oo ugu muujiya ilmahaaga in waxbarashadu muhiim tahay adiga oo wax u akhriyada, adiga oo ka qaybgala shirarka waalidka/macallinka, iyo adiga oo ka qaybgala”kullannada furan.”
- ✓ **Tabaruc:** U tabaruca dugsiga ilmahaaga iyo ka caawinta waxqabadyada waxbarashada ka-baxsan. Ka qaybgal oo taageer ka waxqabadyada ka qaybgalka waalidka ee dugsiga.
- ✓ **Baro:** Sida looga caawiyo ilmahaaga shaqada fasal, shaqada guri iyo qorshayaasha waxbarashada mustaqbalka ah.
- ✓ **Kala qaybqaado:** Ka mid noqoshada ururrada dugsiga/waalidka, kooxaha horumarinta dugsi, Guddiyada Qodobka I, Qaybta A ee la talinta waalid, iyo guddiyada kale ee waalidka.
- ✓ **La shaqee beesha:** Kala qaybgalka waxqabadyada waalidiinta qoysaska kale,oo ogow oo isticmaal kheyraadka beesha degaanka ah (maktabadaha, jaamacadaha, xarumaha beesha, iwm.) si loo kordhiyo xirfadaha iyo hibooyinka u ku helo adeegyada loo baahan yahay ee loogu talagalay ilmahaaga.



## Muxuu Qodobka I, Qaybta A u fidiyaa ilmaha?

**Barnaamijka Qodobka I, Qaybta A ayaa siin doona ilmahaaga caawimaad tacliimeed dheeraad ah oo ah xisaab, akhriska, iyo xirfadaha luqadda.**

Caawimo tacliimeed dheeraad ah ayaa noqon kara:

- ■ **Waxyaabaha tacliinta loo istcimaalo ee dheeraadku u ah wax u dhigitaanka caadiga ah.**
- ■ **Macallimiinta iyo kalkaaliyeyaasha tacliimeed**
- ■ **Hal-min-hal qof ama koox wax ugu dhigitaan**

## Sidee ayay ku helaan dugsiyadu lacagaha Qodobka I, Qaybta A?

- ■ **Marka hore, dowladda sare ayaa u siisa lacagta gobol kasta iyada ku saleysan xogta tirakoobka.**
- ■ **Markaa, Hay’ad Waxbarasho Gobol (SEA) kasta ayaa siisa lacag degmooyinkeeda dugsi. Degmooyinka ayaa go’aamiya dugsiyada u qalma lacag siinta Qodobka I, Qaybta A iyaga oo raaca xeerarka Qodobka I, Qaybta A ee ESEA.**
- ■ **Ugu dambayntii, degmo kasta ayaa go’aamisa kuwa dugsiyadooda heli doona adeegyada barnaamijka Qodobka I, Qaybta A iyada oo ku saleysan boqollayda Qadada Dugsiga ee bilaashka ah ama jaban. Markaana dugsiga ayaa:**
  1. **In la garto ardayda u baahan gacan-qabasho dheeraad tacliimeed ah kuna saleysan shuruudaha la rabo. Ardaydu MA aha uun kaliya inay ka soo jeedaan qoysas dakhli-hoosaad ah si ay u helaan adeegyada Qodobka I, Qaybta A.**
  2. **In loo dejiyo yoolal lagu horumariyo xirfadaha waxbarasho ahaan dhaqaalahoodu liito ee ka tirsan dugsigooda.**
  3. **In loo soo saaro barnaamijyo arday kasta shaqsi ahaan si loo taageero/kabo tacliinta faslaka ee caadiga ah.**
  4. **In la qiyaaso horumarka ardayga si loogu go’aamiyo guuleysiga barnaamijka Qodobka I, Qaybta A ee arday kasta.**

*Cilmi-baarista ayaa sheegeysa marka dugsiyada, qoysaska, iyo kooxaha beeleed u wada shaqeeyaan sidii ay u taageeri lahaayeen waxbarashada, carruurta ayay u badan tahay inay waxbarashada ku sii fiicnaadaan, dugsiga in ka badan ku sii jiraan, oo ay dugsiga ka jeclaadaan sidii hore.*

**Si aad hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Cinwaaka I, Qaybta A nagu soo booqo degelkayga internetka ee ku yaal:**

**http://www.k12.wa.us/TitleI**